

OGEYSIISYADA

Dhamaan dhageysiyada iyo ogeysiisyada go'aanka waxaa dhamaan dhinacyada loogu diri doonaa email, haddii la bixiyo, ama waxaa loogu diri doonaa boostada sugan. Sii wadidda waa kooban tahay, sidaas darteed fadlan isu diyaari in aad soo bandhigid kiiskaada.

KA NOQOSHO

Ashtakoodaha wuxuu iskiisa uga noqon karaa ashtakada marku uu soo gudbiyo ogeysiiska ka noqoshada, oo qoraal ah, kuna socota Karaaniga Guddiga. Hase ahaatee, haddii Guddiga Waxbarashada la ogeysiiyay ashtakada, weli waxay haystaan fursad ay ku dabagalaan kiiska.

GO'AANADA

Dhamaan racfaanada Guddiga waxaa la gelin doonaa diiwaanka. Koobiyada go'aanka waxaa dhamaan dhinacyada loogu diri doonaa email, haddii la haayo, ama waxaa loogu diri doonaa boostada sugan.

SIDA RACFAAN LOOGA QAATO GO'AANKAADA

Racfaanka laga qaato go'aanka Guddiga Baddalaadda (Board of Revision) waxaa loola tagi karaa Guddiga Racfaanka Canshuurta Ohio (Ohio Board of Tax Appeals) ama Maxkamadda Dacwadaha Caadiga (Court of Common Pleas) muddo 30 maalin gudahooda kaddib marka ogeysiiska go'aanka BOR lagu soo diro boostada.

Sidoo kale, koobiga racfaanka waa in loo gudbiyo Guddiga Baddalaadda.

Waxaad foomka racfaanka (DTE4) ka codsan kartaa BOR ama waxaad ka soo dagan kartaa franklincountyauditor.com/real-estate/board-of-revision.

ISBADDALADA QIIMAHA

Dhamaan go'aanada waxaa la haayaa 30 maalin inta la sugaayo racfaan. Marka waqtiga dhamaado kaddib, haddii aan la soo gudbinin racfaan, waa la habeyn doonaa diiwaanka kaddibna lacag celin ama deyn ayaa la soo saari doonaa haddii loo baahdo in hoos loo dhigo qiimaha.



GUDDIGA BADDALAADDA

franklincountyauditor.com



Nagala soco Twitter
twitter.com/FC_Auditor



Nagu jeclow Facebook
facebook.com/mstinziano

MICHAEL
STINZIANO
Franklin County Auditor



franklincountyauditor.com

FIIRINTA
QIIMAHA HANTIDAADA



GUDDIGA BADDALAADDA

373 S. High Street, 20th Floor
Columbus, OH 43215
P: (614) 525-HOME
F: (614) 525-6252



Nagala soco Twitter
twitter.com/FC_Auditor



Nagu jeclow Facebook
facebook.com/mstinziano

GUDDIGA BADDALAADDA

MAXAY TAHAY UJEEBADA GUDDIGA BADDALAADDA?

Guddiga Baddalaadda (Board of Revision) (BOR) waxaa aasaasiyan loo sameyay in uu fiiriyo qiimaha hantida maguuraanka xagga taariikhda deynta lagu leeyahay (Janaayo 1) canshuurta sannadka su'aasha ka taagan tahay. BOR waxay fiirin doontaa dhamaan caddeynta ansaxa ah taasoo ay ku taageerto ashtakada ka soo horjeedo qiimaha la siiyo hantida maguuraanka. BOR ma dhageysato ashtakooyinka ku saabsan canshuurta. Ujeedada BOR waxay tahay in milkiilaha hantida loo suurto geliyo in uu si xaq ah u fiiriyo qiimeynta hantida.

Fiiri Qiimeynta Hantidaada

BOR waa guddi ka kooban saddax xubin oo qiimeya qiimaha hantida, wuxuu ka kooban yahay Xisaabiyaha Dagmada (County Auditor), Hanti Dhowrka Dagmada (County Treasurer), iyo xubin ka tirsan Guddiga Guddoomiyeyaasha Dagmada (Board of County Commissioners) ama wakiiladooda.

DHAGEYSIGA VS. DHEXDHEXAADINTA

Ashtakooyin badan oo la xariira Guddiga Baddalaadda waxay u baahan yahii dhageysiga rasmiga ee qof ahaan looga qeybgalo. Hase ahaatee, waxaa dhici karto in kiiskaada loo garto in lagu dhameeyo dhexdhexaadinta, taasoo ku siisa fursad in aad si aan rasmi ahayn oo wadahal aad uga hadashid, lana adeegsado brograamka Dhexdhexaadinta Xafiiska Xisaabiyaha Dagmada Franklin (Franklin County Auditor's Office Mediation program). Dhamaan ashtakooyinka BOR waxaa fiiriya shaqaalaha iyo kuwa la kulma habka dhexdhexaadinta waxaa loo gudbiyaa brograamka dhexdhexaadinta.

DHEXDHEXAADINTA

HESHIIS KA GAAR QIIMEYNTA HANTIDAADA

Dhexdhexaadinta waa fursad uu qof madax banaan oo dhexdhexaad ah (dhexdhexaadiye) ku fududeeyo isdhaafsigiyo iyo wada xaajoodka dhexmara milkiilaha hantida iyo Xafiiska Xisaabiyaha (Auditor's Office) kuna kaalmeeyo iyaga in ay iskooda u gaaraan heshiis ku saabsan qiimaha hantida. Habka wuxuu dibadda ka yahay habka dhageysiga Guddiga Baddalaadda (Board of Revision). Hase ahaatee, BOR waa in ay ogolaato heshiis kasta oo laga gaaro dhexdhexaadinta



SIDA LOO GUDBIYO ASHTAKADA

Tilmaamahaan looguma talogelin in ay u shaqeyaan sida talo bixin la xariirto sharciga

Foomamka ashtakada waxaad ka heli kartaa franklincountyauditor.com/real-estate/board-of-revision ama marka aad wacdid (614) 525-3913 kaddibna waxaa lagu soo diri doonaa koobi.

Guddiga Baddalaadda wuxuu awood u leeyahay canshuurta sannadka aad soo gudbisid keliya. Lama tixgelin doono sannadahii la soo dhaafay.

Waxaa la ogolaan doonaa ashtakooyinka ilaa Maarso 31 (ama maalinta shaqada ee ku xigta haddii Maarso 31 ku beegan tahay dhamaadka todobaadka).

WAA LA SOO GUDBIN KARAA ASHTAKADA:

🏠 Qof ahaan ama boostada
**373 S. High St., 20th Floor
Columbus, OH 43215**
waa in la shabadeeyo ugu dambayn Maarso 31 (ama maalinta xigta ee la shaqeyo haddii Maarso 31 ku dhacdo dhamaadka todobaadka).

🏠 Boostada bor@franklincountyohio.gov

🏠 Faks (614) 525-6252

WAXA LOO BAAHAN YAHAY IN AAD RAACISID ASHTAKADAADA

Gudbiyaha ayaa mas'uul ka ah in uu caddeeyo qiimaha xaq ee suuqa. Waxaa dhici karto in warqadaha soo socdo dadajiyaan ashtakadaada:

- 🏠 Sawirada burburka soo gaaray gudaha ama xaaladda uu ay ku sugan tahay hantidaada.
- 🏠 Qiimeyn madax banaan oo khidmad la bixiyo oo dhawaan la sameyay.
- 🏠 Hantida dhawanahaan la iibiyay, koobiga bayaanka soo afjaridda iyo heshiiska iibinta.
- 🏠 Bayaanada dakhliga iyo kharashka, haddii lagu dabaqi karo.
- 🏠 Iibinta Leys Barbar Dhigi Karo

WAXA LAGA FILAN KARO DHAGEYSIGA

Kaddib marka aad heshid ogeysiiska dhageysiga, fadlan qaado waqti aad ku fiirisid Sharciyada Dhaqanka iyo Hababka (Rules of Practice and Procedures) ee lagu soo dhajiyay franklincountyauditor.com/real-estate/board-of-revision. Dhageysiga wuxuu aad ula mid yahay dacwadda maxkamadda, iyo markhaatiyada, warqadaha ku lifaaqan, iyo sharciyada.

YAA JOOGA?

🏠 Guddi ka kooban saddax sarkaalka oo dhageysta iyo mattala Xisaabiyaha (Auditor), Guddiga Guddoomiyeyaasha (Board of Commissioners), iyo Hanti Dhowrka (Treasurer).

🏠 Dhinacyada ay quseeyso ashtakada waxaa ka mid ah milkiilaha hantida, wakiiladooda sharciga, iyo/ama Guddiga Waxbarashada.

MAXAA KA DHACA DHAGEYSIGA?

🏠 Sarkaalka dhageysiga ayaa soo gudbiyay kiiska kaddibna ku weydiiyay in aad bixisid magacaada.

🏠 Bacdamaa aad tahay dhinaca soo gudbiya racfaanka ("Ashtakoodaha"), adiga ayaa soo bandhigi doontid kiiskaada marka hore, waxaad keeni doontaa dhamaan caddeynta iyo maragta loo baahan yahay in aad la timaadid kuna taageertid qiimaha aad raadineysid.

🏠 Qof kasta oo markhaati fura waxaa loo dhaari doonaa sida markhaati.

🏠 Waa la calaameyn doonaa dhamaan warqadaha loo soo gudbiyay caddeyn ahaan waxaana lagu dhaafi doonaa Guddiga.

🏠 Marka aad soo gabogabeysid bandhigaada, waxaa dhici karto in uu su'aalo ("su'aalo dadban") ku weydiiyo qareenka dhinacyada haray ama sarkaalka dhageysiga.

🏠 Badanaa dhageysiyada waxay qaataan 10-30 daqiiqo.

GOORMAA LA GAARI DOONAA GO'AAN?

Kaddib marka la soo gabogabeeyo BOR, saddaxda xubin ee ka tirsan Guddiga ayaa tixgelin doono diiwaanka dacwadda BOR, maragta la soo jeediyay iyo waxyaabaha ku lifaaqan oo loo gudbiyay sida caddeyn. Kaddib marka la gaaro go'aanka, waxaa dhamaan dhinacyada loogu gudbin doonaa email, haddii la haayo, ama waxaa loogu diri doonaa boostada la hubiyo.

